## SOMALI TRANSLATION of the Department for Education statutory guidance for schools and colleges:

## Keeping children safe in education 2023

## Part one: Information for all school and college staff

Find KCSIE Part 1 translated into 13 community languages at **kcsietranslate.lgfl.net**

NB This translation goes up to and includes the diagram on page 22 on the full version of part one (it does not include the Annex of Part 1 – which is Annex B in the full version)

Department for Education

# Ilaalinta badqabka caruurta ee waxbarashada 2023

## Hagaha sharciga dugsiyada iyo Kuliyadaha

**1-da Sabteembar 2023**

# Nuxurka

## Waa maxay xaalada hagahani?

Tani waa hagaha sharciga Waaxda Waxbarashada ('Waaxda') oo lagu soo saaray Farqada 175 ee Xeerka Waxbarashada 2002 (la badelay), Waxbarashada (Heerarka Dugsiyada Madaxa bannaan) Qawaaniinta 2014, Dugsiyada Gaarka ah ee Aan Dawlada aheyn (England) 2015 iyo Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Sharciga Waxbarashada 2009 (sida wax laga baddalay). Dugsiyada iyo kuliyadaha England waa **waajib** iney u tixgaliyaan marka ay gudanayaan waajibaadkooda ah ilaalinta iyo horumarinta daryeelka carruurta. Ujeedooyinka hagahani awgeed carruurta waxaa kamid ah qof kasta oo kayar da'da 18.

## Xog ku saabsan hagahan

Waxaan adeegsanaa erayga **"waajib"** iyo **"waa in**" hagaha oo dhan. Waxaan u adeegsanaa erayga "**waajib**" marka qofka lagu muransanyahay sharciyan in laga rabo inuu wax sameeyo oo "**waa in**" marka talada soo baxdo ay tahay in la raaco ilaa inay jirto maahee sabab macquul ah oo aan lagu raaceyn. Hagaha **waa in** lala akhriyaa:

- sharciga hagaha Working Together to Safeguard Children (Kawada shaqaynta Badbaadada Carruurta), iyo
- talada waaxda What to do if you're worried a child is being abused: advice for practitioners (Waxa la sameeyo haddii aad ka walwalsantahay in ilmo lagu xadgudbo: talo ku aadan dhakhaatiirta)

**Ilaa haddii si kale loo cadeeyey mooyee**:

- **dugsi**' macnihiisu waa: dhammaan dugsiyada ha ahaato kuwa dawlada, kuwa aan dawlada aheyn ama kuwa madaxa-bannaan (ay kamid tahay akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyada wax bixinta baddalka udhiganta), dugsiyada[1] xannaanada dawlada iyo qaybaha gudbinta ardayda.

[1] Early Years Foundation Stage Framework (Qaaab-dhismeedka Heerka Asaaska Sanadaha Hore) (EYFS) waajib ayey kutahay dhammaan adeeg-bixiyeyaasha sannadaha hore. Waxay khusaysaa dhammaan dugsiyada, oo ay ku jiraan dugsiyada xannaanada dawlada ee leh bixinta adeegyada sannadaha hore. Dugsiyada xannaanada dawlada, sida dugsiyada kale ee ku hoos qoran 'Ku Sahabsan hagahan', waa iney tixgeliyaan iney carruurtu Kusuganyihiin badbaado waxbarasha gudeheeda marka ay gudanayaan waajibaadka ilaalinta iyo horumarinta daryeelka carruurta (iyadoo loo eegayo faraqa 175(2) ee xeerka waxbarashada 2002 – eeg qoraalka hoose 19 si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo kusaabsan shuruudahan).

- ‘**kuliyad**’ micneheedu waa kuliyadaha waxbarashada sare iyo kuliyadaha foomka lixaad sida lagu aasaasay Xeerka Waxbarashada Dheeraadka ah iyo Sare 1992 iyo machadyada loo magacaabay iney ku jiraan faraqa waxbarashada sare[2]. Kuliyadda sidoo kale macneheedu waa bixiyeyaasha waxbarashada 16-ka dambeeyay sida ku qeexan Tababarrada, Xirfadaha, Carruurta iyo Xeerka Waxbarashada 2009 (sida wax laga baddalay)[3]: Akadeemiyada 16-19, machadyada Gaarka ah ee ka dambeeyay 16 iyo Bixiyeyaasha Tababarka Madaxbanaan. Kuliyadaha, hagahan ayaa la xiriirtaa mas'uuliyadooda ku wajahan carruurta waxbarasho ama tababar ka helaysa machadyadan.

## Dhibanayaasha iyo dambiilaha(yaasha) la eedeeyay

Ujeedada hagahan, waxaan u isticmaalnaa kalmada ‘**dhibane**’. Waa eray si ballaaran loo aqoonsado loona fahmo. Waxaa muhiim ah in dugsiyada iyo kuliyaduhu u aqoonsadaan in qof kasta oo lagu xadgudbay uusan isku heysan dhibane ama aanu rabin in sidaas lagu sifeeyo. Ugu dambeyn, dugsiyada iyo kuliyaduhu waa iney ku baraarugaan tan marka ay maamulayaan wax alla wixii dhacdo ah oo ay u diyaar ahaadaan isticmaalka wax alla wixii eray ah ee shakhsiga ilmuhu ugu qanacsanaanta badanyahay.

Ujeedada taladan awgeed, annaga, meelaha qaar, waxaaan u isticmaalnaa ‘**dhagarbaha(yaasha) eedeysan**’ iyo halka ay munaasabka ku tahay ‘**dhagarqabaha(yaasha)**’. Kuwani si ballaaran ayaa loo isticmaalaa ama loo aqoonsanyahay iyo sida ugu habboon ee lagu caawinayo diyaarinta hagaha wax ku ool ah. Haseyeeshee, dugsiyada iyo kuliyadaha waa inay si taxadar leh uga fakaraan erayga, gaar ahaan marka ay ka hor hadlayaan caruur, yeysan ahaan ugu yaraan mararka qaar in habdhaqanka aflagaadada ay sidoo kale waxyeello ku tahay dhagarqabaha. Sida sarreysa, isticmaalka erayga habboon waxaa go'aaminaya dugsiyada iyo kulyadaha, sida ay kolba ugu habboontahay, taas oo kiisaska ku saleysan.

## Yaa loogu talogalay hagahan?

**Hagaha sharcigani waa in lala akhriyaa oo ay raacaan:**

- Guddiga maamulka ee dugsiyada dawlada (ay kamid tahay dugsiyada xanaanada dawlada) kulyadaha ay kamid tahay  bixiyeyaasha waxbarashada 16 ka dambeeya

---

[2] Sida ku cad faraqda 28 ee Xeerka Waxbarashada Dheeraadka ah iyo Sare ee 1992 ('xarumaha la magacaabay').

[3] Apprenticeships, Skills, Children and Learning Act 2009 (as amended) (Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Xeerka Waxbarashada 2009 (sida wax laga baddalay))

sida ku cad Xeerka Tababarada, Xirfadaha, Carruurta iyo Waxbarashada 2009 (sida wax laga baddalay): Akadeemiyada 16-19, machadyada Gaarka ah ee 16 ka dambeeya iyo Bixiyeyaasha Tababarka Madaxa banaan

- mulkiilayaasha dugsiyada madaxa banaan (oo ay kamid tahay akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo machadyada kale ee wax bixinta) iyo dugsiyada gaarka ah ee aan dawlada aheyn. Marka laga eego xaga akadeemiyada, dugsiyada bilaashka ah iyo akadeemiyadda kale ee wax bixinta, mulkiiluhu wuxuu noqon doonaa kalsoonida akadeemiyadda
- guddiyada maamulka ee qeybaha gudbinta ardada (PRUs), iyo
- kooxaha hogaanka sare

Inta lagu jiro hagaha, tixraaca '**guddigaa maamulka iyo mulkiilayaasha**' waxaa ku jira guddiyada maamulka inaan lasoo sheegin maahee.

## Shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada

Waa muhiim in **qof kasta** oo ka shaqaynaaya dugsi ama kuleej uu fahmo waajibaadka ka saaran ilaalinta carruurta. Guddiga maamulka iyo mulkiilayaasha waa iney hubiyaan in shaqaalaha sida tooska ah ula shaqeeya carruurta akhriyaan **ugu yaraan** qaybta koobaad ee hagahan.

Guddiga maamulka iyo mulkiilayaasha, la shaqaynaya kooxahooda hogaanka sare iyo gaar ahaan hogaanka ilaalinta loo magacaabay, waa inay xaqiijiyaan in shaqaalaha aan sida tooska ah ula shaqeyn carruurta ay akhriyaan faraqa koowaad ama Lifaaqa A (nooca la isku koobay ee Qaybta koobaad) ee hagahan. Tani gabi ahaanteed waa arin u taala dugsiga ama kuliyada waxaana lagu salayn doonaa qiimayntooda ku aadan hagaha waxtarka ugu badan u leh shaqaalahooda si ay u ilaaliyaan una hormariyaan faya dhawrka carruurta.

Guddiga maamulka iyo mulkiilayaasha waa iney hubiyaan iney meel mariyaan geedisocod ay ku caawiyaan shaqaalaha si ay u fahmaan oo ay u gutaan doorarkooda iyo mas'uuliyadaha sida ku qeexan Farqada kowaad (ama Lifaaqa A haddii ay habboon tahay) ee hagahan.

## Muxuu hagahani badelayaa?

Hagahani wuxuu badelayaa Badbaadinta carruurta ee waxbarashada 2022.  Jadwal isbaddallo muhiim ah ayaa kamid ah Lifaaqa F

# Qaybta Koobaad: U ilaalinta macluumaadka dhammaan shaqaalaha

## Waxa ay tahay in shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay ogaadaan oo ay sameeyaan

### Nidaamka diirada saaraya ilmaha ee iskuxidhan si loo ilaaliyo

1. Dugsiyada iyo kuliyadaha iyo shaqaalahooda waxay qayb muhiim ah kayihiin hanaanka balaaran ee nidaamka ilaalinta caruurta. Nidaamkan ayaa lagu qeexay sharciga hagaha Kawada shaqaynta Ilaalinta Caruurta.

2. Ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka caruurta ayaa ah masuuliyad **qof kasta** saaran. **Qof kasta** oo caruurta iyo qoysaskooda xiriir la samayn kara waxaa uu leeyahay door uu ka ciyaarayo. Si loo buuxiyo masuuliyadan si wax ku ool ah, dhammaan dhakhaatiirta waa inay xaqiijiyaan waajahooda udub dhexaadka ilmaha. Tani waxay kadhigan tahay inay tixgaliyaan, markasta, waxa ay tahay **maslaxada ugu fiican** ee ilmaha.

3. Majiro adeeg sameeya kaliya oo haysan kara sawirka baahiyaha buuxa ee ilmaha iyo duruufaha uu kujiro. Haddii carruurta iyo qoysaska ay tahay iney helaan caawimada saxda ah wakhtiga saxda ah, **qof kasta** oo iyaga la xiirira waxa uu door ku leeyahay in uu ogaado waxa ay tabanayaan, la wadaago macluumaadka, iyo qaadista tallaabo dagdag ah.

4. Ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka caruurta waxaa lagu qeexaa marka aga fiirsho ujeedooyinka hagahaan:

- ka ilaalinta caruurta si xun ula dhaqanka
- ka hortaga laxaad la'aanta caruurta ee dhimirka iyo caafimaadka ama korrniinka jirka
- xaqiijinta in caruurtu u korto qaab waafaqsan bixinta daryeelka amaanka iyo wax ku oolka, iyo
- qaadista tallaabo si loogu sahlo in dhammaan caruurtu helaan natiijooyinka ugu fiican.

5. 'Carruur' waxaa kamid ah qof kasta oo ka yar da'da 18.

### Doorka shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda

6. Shaaalaha dugsiga iyo kuliyadda si gaar ah ayey muhiim uyihiin maadaama ay leeyihiin awood ay ku aqoonsadaan walaaca ilmaha xili hore, iney kor u qaadaan faya dhawrka carruurta iyo inay siin karaan caruurta caawimaad, ayna kahortagi karan in walaaca ay caruurtu qabaan kasii daro.

7. **Dhammaan** shaqaalaha waxa ay mas'uul ka yihiin iney bixiyaan bee'ad ammaan ah oo ay carruurta wax ku baran karaan.

8. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay u diyaar garoobaan inay aqoonsadaan carruurta laga yaabo iney ka faa'iidaystaan caawinta hore[4]. Caawinta hore waxaa looga jeedaa in taageero lasiiyo ilmaha isla marka dhibaatadu timaado xili kasta oo kamid ah nolosha ilmaha, lagasoo bilaabo sanadaha aasaaska ilaa markay gaaraan dhawr iyo toban jiro.

9. **Xubin kasta oo shaqaale** ee qaba **wax** walaacyo kusaabsan fayo dhawrka ilmaha waa iney raacdaa nidaamka ku qoran qaybta 51-67. Shaqaaluhu waa inuu diyaar u ahaadaa kataageerista shaqaalaha arimaha bulshada iyo wakaaladaha kale iyaga raacaaya gudbinkasta.

10. Dugsi iyo kuliyad **kasta** waa inuu yeeshaa cid hogaan loo magacaabay ilaalinta oo siiya taageero shaqaalaha iney qabtaan hawlaha ilaalinta oo ay si dhaw ula shaqeeyaan adeegyada kale sida daryeelka bulshada caruurta ee maamulka deegaanka.

11. Hogaanka badbaadinta ee shaqada loo magacaabay (iyo cid kasta oo kuxigeeno u ah) waxay ubadanyihiin iney haystaan sawirka dhamaystiran ee ilaalinta ilmaha uuna noqdo hogaanku qofka ugu haboon ee katalo bixinaaya jawaabta laga bixinaayo walaacyada dhanka ilaalinta.

12. Heerarka Macalimiinta 2012 ayaa dhigaya in barayaashu (oo ay kamid yihiin maamulayaasha) ay ilaaliyaan wanaagga carruurta oo ay ilaalinta kalsoonida ay dadweynuhu ku qabaan xirfadda barayaasha taasoo qayb ka ah waajibaadkooda shaqo[5].

## Waxa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada ay u baahan yihiin inay ogaadaan

13. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay la socdaan nidaamyada dugsiyadooda ama kuliyada taageerta ilaalinta, oo waa in tan loogu sharaxaa marka loo idmanayo shaqaalaha. Tani waa waa inay ku jiraan:

- siyaasada ilaalinta ilmaha (iyo waxyaabo kale oo la socda oo sidoo kale ay ku jiraan siyaasada iyo nidaamyada lagaga jawaabayo tacaddiga ilme-ilme kale kula kaco)

---

[4] Macluumaadka faahfaahinaya caawimada hore waxa laga helayaa Cutubka 1 Working Together to Safeguard Children (Ka Wada Shaqaynta Ilaalinta Caruurta).

[5] Teachers' Standards (Heerarka Macalimiinta) waxa uu khuseeyaa: cida lagu tababarayo ee ka shaqaynta QTS; dhammaan barayaasha dhammaystiraya mudada sharciga (barayaasha sida cusub ugu qalma [NQTs]); iyo barayaasha dugsiyada dowlada, oo ay kamid yihiin dugsiyada gaarka loo maamulo, oo ay ku waajibto Waxbarashada (Qiimeynta Bareyaasha Dugsiga) (England) Shuruucda.

- siyaasadda dhaqanka (taas oo ay kamid tahay tallaabooyinka looga hortagayo cagajuglaynta, oo ay ku jiraan xoogsheegashada internet-ka, cagajuglaynta ku salaysan eexda iyo takoorka) [6]
- siyaasada habdhaqanka caruurta (mararka qaar loo yaqaan xeerka anshaxa) iyo waxyaabo kale, oo ay ku jiraan walaacyo yar, eedeymaha shaqaalaha iyo khashifida
- Falcelinta ilaalinta carruurta ka maqan waxbarashada, gaar ahaan waqtiyada soo noqnoqda iyo/ama mudada dheer iyo
- doorka hogaamiyaha loo doortay ilaalinta amaanka (ayna kamid tahay aqoonsiga hogaanka loo magacaabay ilaalinta caruurta iyo cid kasta oo kuxigeeno u ah).

Nuqulada siyaasada iyo nuqulka Faraqda koobaad (ama Lifaaqa A, hadii ay ku munaasab tahay) ee waraaqahan waa in loo ansixiyaa **dhammaan** shaqaalaha loo idmaday.

14. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay helaan tababar ku habboon ilaalinta iyo ilaalinta carruurta (ay kamid tahay badbaadada internet-ka oo ay kamid yihiin waxyaabo kale, oo ay ku jiraan fahamka waxyaabaha laga filayo, doorarka iyo mas'uuliyadaha habboon ee la xiriira shaandheynta iyo la socodka - eeg para 141 wixii macluumaad dheeraad ah) marka la soo bandhigo. Tababarka waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa. Waxa intaas dheer**, dhammaan** shaqaalaha waa inay helaan macluumaadka ugu danbeeyay ee amaanka iyo ilaalinta guud (oo ay ku jiraan amaanka onlaynka) (tusaale ahaan, waa iney ku helaan iimeel, daabacaad iyo kulamada shaqaalaha), sida loogu baahdo, iyo ugu yaraan sanadkii, si loogu sii wado xirfad iyo tacliin ilaalinta caruurta wax ku oolka ah.

15. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney la socdaan nidaamka caawinta hore ee deegaankooda oo ay fahmaan kaalintooda.

16. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney ka warqabaan geedi-socodka loo gudbinayo daryeelka bulshada carruurta ee dawladda hoose iyo qiimaynta[7] sharciga ee hoos timaadda Xeerka Carruurta 1989, gaar ahaan faraqa 17 (carruurta baahida u leh) iyo faraqa 47 (ilmaha silica, ama ay u badantahay iney soo gaarto, waxyeelo weyn) taasoo sababi karta gudbin, oo ay la socoto doorka laga filayo iney ka ciyaaraan qiimayntaas.

17. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney garanayaan waxa ay samaynayaan hadii ilmuhu u sheego in lagu tacadiyo, laga faa'idaystay ama la dayacay. Shaqaaluhu waa inay yaqaanaan sida ay umaaraynayaan heerka ilaalinta asturaad habboon. Tani

---

[6] Dhammaan dugsiyada waxaa looga baahanyahay iney yeeshaan siyaasada habdhaqanka (faahfaahin dheeraad ah here (halkan). Haddii kuliyadu uu ubaahato iney dagsato xeerka habdhaqanka waa in loosheegaa shaqaalaha sida kor kuqeexan.

[7] Macluumaadka faahfaahinaya qiimaynta sharciga waxaa uu ku jiraa Cutubka Working Together to Safeguard Children (Wada-shaqeynta Badqabka Caruurta)

macneheedu waa in dadka ku lugleh ee u baahan inay ku lugyeeshaan, sida hogaanka ilaalinta loo magacaabay (ama ku xigeenkiisa) iyo daryeelka bulshada caruurta ee maamulka deegaanka. Shaqaalaha waa ineysan marna ilmaha uballan qaadin ineysan cidna usheegi doonin warbixintiisa nooc kasta oo xadgudubka ah, maadaama aysan arintaani ugu dambeyn noqon doonin maslaxada ugu haboon ee ilmaha.

18. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay u muujin karaan dhibanayaasha in la aaminay oo la taageeri doonto oo amaankooda la sugi doono. Dhibanaha waa inaan la tusin isha ah iney iyagu abuureen mushkilad marka ay ka warbixiyeen **wax** tacaddi iyo/ama dayacaad ah. Oo yeysan noqon in dhibane marna la dareensiiyo inuu dareemo ceeb markuu soo sheego xadgudubka.

19. **Dhammaan shaqaalaha** waa iney la socdaan in caruurta ay dhici karto ineysan diyaar u ahayn ama ay garanaynin sida loogu sheego qof in lagu tacaddiyay, laga faa'idaystay, ama la dayacay, iyo/ama ay dhici karto ineysan garanaynin iney la kulmeen waxyeello. Tusaale, caruurta waxay dareemi karaan xishood, bahdilaad, ama in loo hanjabay. Tani waxay ka iman kartaa iney nugulyihiin, laxaad la'aan iyo/ama aqoonsiga galmada ama caqabad luqad. Tani waa inaysan ka hor istaagin shaqaalaha iney yeeshaan xirfad loo dhararo oo ay la hadlaan hogaanka ilaalinta loo qoondeeyay haddii ay walaac ka qabaan ilmo. Waxa kale oo muhiim ah in shaqaalaha go'aamiyaan sida ugu wanaagsan ee loo dhisi karo cilaaqaad la isku halleyn karo oo fududeeya xiriirka carruurta iyo dhallinyarada.

## Waxa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyadda ay tahay iney u kuurgalaan

### Caawin hore

20. Ilmo **Kasta** ayaa kafaa'iidi kara caawimaada hore, laakiin dhammaan shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada waa iney si gaar ah ugu feejignaadaan baahida imaan karta ee laxariirta in caawin hore lasiiyo ilmaha:

- laxaad la' ama qaba xanuunada qaar oo qaba baahiyo dheeraad ah oo gaar ah
- wuxuu leeyahay baahiyo waxbarasho oo gaar ah (ha haystaan ama yey haysan qorshe waxbarasho, caafimaad iyo daryeel sharci ah)
- qaba baahi caafimaad oo dhimirka ah
- ah daryeele dhalinyaro ah
- muujinaya calaamado u horseedayay kadhex bixidda dadka ama habdhaqan danbiile, oo ay kamid tahay kulugu yeelasho burcad iyo la shaqaynta danbiyada lasoo abaabulay ama khadka ismaamulka
- si joogto ah uga maqan/maqnaada daryeelka ama guriga

- khatar ugu jira adoonsiga casriga ah, tahriibin, ka faa'idaysi galmo ama xadgudub
- khatar ugu jira in uu noqdo xagjir ama laga faa'idaysto
- leh xubin qoys oo ku jirta xabsi, ama ay saamayn ku yeesheen ka careysiinta waalidka
- ay xaalada qoysku ku keentay caqabad ilmaha, sida balawadaha mukhaadaraadka iyo khamrida, mushkilada caafimaadka dhimirka dadka waawayn iyo tacaddi guriga dhexdiisa ah
- leh laftiisu balwado khamri iyo mukhaadaraad kale
- katagay daryeelka oo ku noqday guriga qoyskiisa
- halis ugu jirtaa waxa loogu yeero 'sharaf' ku salaysan xadgudubka sida gudniinka fircooniga ah ama Guurka Khasabka
- ah ilmo si gaar ah loo korsado, ama
- si joogto ah uga maqan waxbarashada, oo ay kamid tahay maqnaanshiyada joogtada ah ee qayb kamid ah maalinta dugsiga.

## Xadgudub iyo dayacaad

21. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney ka warqabaan tilmaamayaasha xadgudubka iyo dayacaadda (hoos eeg), fahamka in carruurtu halis ugu jiraan waxyeello gudaha iyo dibadda dugsiga/kuliyada, gudaha iyo dibadda guriga, iyo onlaynka. In la yeesho dharar xirfadle oo la ogaado waxa ay tahay in la eego taas oo muhiim u ah ishaarooyinka hore ee tacadiga iyo dayacaada si markaa shaqaaluhu ay u ogaan karaan kiisaska caruurta ee u baahan kaalmo ama ilaalin.

22. **Dhammaan** shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada waa iney ogaadaan in arimaha xadgudubka, dayacaadda iyo ilaalinta ilmaha ay yihiin dhacdooyin kali ah oo aynsan kulligood lagu koobi karin hal qeexitaan ama summad. Inta badan, arrimo badan ayaa midba mid kale abuurayaa.

23. **Dhammaan** shaqaalaha, laakiin si gaar ah hogaanka loo magacaabay badbaadada (iyo ku xigeenadooda) waa inay ka fiirsadaan in carruurtu khatar ugu jiraan xadgudub ama ka faa'iidaysi lagu sameeyo intay ku jiraan xaaladaha ka baxsan qoysaskooda. Waxyeellada dheeraadka qoyska oo noocyo kala duwan ah oo caruurta ka dhigi karta kuwo u nugul waxyeelooyin kala duwan oo ay kamid tahay (laakiin aan lagu koobin) tacaddi galmo (waxaa kamid ah hanjabaad iyo ka faa'idaysi), tacaddiga guriga dhexdiisa ee xiriirkooda gaarka ah (tacaddiga xiriirka dhawr iyo toban jirada), ka faa'idaysiga danbi, ku xadgudubka dhalinyarta ee daran, khadka ismaamulka iyo xagjirnimo.

24. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney la socdaan in tignooloojiyadu ay qayb wayn ka tahay ilaalinada badan ee badqabka iyo faya dhawrka. Caruurtu waxay khatar ugu jirtaa tacadiga iyo khataraha kale ee onlaynka ah iyo sidoo kale fool-ka-fool. Marar badan tacaddiga iyo khatarta kale waxay u dhacaan u soo noqnoqta onlayn iyo kuwa aan onlaynka ahayn labadaba. Caruurtu iyaga ayaa sidoo kale onlaynka iyagaa tacaddi isku geysta, tani waxay u dhacdaa fariimo tacadi, hanjabaad iyo dhaqan xumo/nacayb ah, in iyada oo aan la ogolayn qofka lala wadaago sawiro aan wanaagsanayn, gaar ahaan kooxaha wada sheekeysiga, iyo in lala wadaago sawiro iyo muuqaalo qaaqaawan, kuwa aan doonaynin inay helaan waxyaabaha noocaas ah.

25. **Dhammaan kiisaska, hadii ay shaqaaluhu ka shakiyaan, waa inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo doortay ama ku xigeenkooda.**

## Astaamaha muujinaaya xadgudubka iyo dayacaadda

26. **Xadgudub:** waa nooc kamid ah si xun ula dhaqanka ilmaha. Qof ayaa kuxadgudbi kara ilmo ama dayici kara asagoo usababaaya khatar ilmaha kudhacda ama kufashilmaaya talaabadii uu uga difaaci lahaa khatarta. Waxyeelada waxaa kamid noqon karta si xun ula dhaqan aan jir ahaan iyo sidoo kale saamaynta araga si xun ula dhaqanka dadka kale. Tani waxay si gaar ah ula xiriirtaa, tusaale, xiriirka saamaynta galinta caruurta ee dhammaan noocyada tacaddiga guriga dhexdiisa ah. Caruurta waxaa xadgudub loogu gaysan karaa gudaha qoyska ama xarun waxbarasho ama xarun bulsho waxaana kuxad gudbi kara dadka ilmuhu yaqaanaan ama, marar dhif ah, dad kale. Xadgudubka ayaa kadhici kara gabi ahaanba khadka oonlaynka, ama farsamada casriga ah ayaa loo adeegsan karaa fududaynta xadgudub aan oonlayn ahayn. Caruurta waxaa ku xadgudbi kara qof qaangaar ah ama dad qaangaar ah ama ilmo kale ama caruur kale.

27. **Xadgudubka jirka ah:** waa nooc kamid ah xadgudubka kaasoo ay kujiri karaan kudhufasho, gilgilid, tuuris, sumayn, gubid ama canaan, biyo kuquusin, naqas kudhajin ama hadii kale dhibaato loo gaysto ilmaha jir ahaan. Dhibaataynta jirka ayaa sidoo kale imaan karta marka waalid ama qof daryeele ah uu buunbuuniyo, ama si kas ah ugu rido, xanun ilmaha.

28. **Xadgudub shucuur:** niyad jabinta joogtada ah sida in lagu abuuro saamayn daran oo xun kobaca dareen ee ilmaha. Waxaa kujiri kara in ilmaha loogu celceliyo inuu yahay mid nacas ah ama aan cidna jeclayn, aan wax kutoornayn, ama kaliya ay qiimo uleeyihiin sabab laxariirta inay baahida qofkale buuxshaan. Waxaa kamid ahaan kara inaan ilmaha lasiin fursado uu ku sheego waxa uu dareemaayo, in si gardarro ah loogu xiro hadalka ama 'lagu shactiraysto' waxa uu sheego ama sida uu u hadlo. Waxaa kujiri kara in himilooyin aan kuhaboonayn da'da ama heerka kobaca ee ilmaha kuwaasoo sandulle looga dhigo caruurta. Kuwaan waxaa kamid noqon kara isdhexgal uusan ilmuhu gaarin marka laga fiirsho awoodiisa kobac iyo sidoo kale difaac xaddhaaf ah iyo in laxakameeyo waxyaabaha ay daawan karaan iyo waxbarashadooda, ama in ilmaha laga hor istaago kaqaybgalka isdhexgalada caadiga ah ee bulshada. Waxaa kujiri kara araga ama maqalka sida xun ee loola dhaqmay ilmo kale. Waxay noqon kartaa cagajugleyn

daran (oo ay kamid tahay hanjabaada internet-ka) taasoo keenaysa in caruurtu si joogto ah udareemaan cabsi ama inay halis kujiraan, ama in lasasabto ama musuq carruur. Qaar kamid ah heerka xad gudubka shucaareed ayaa laxariira dhammaan noocyada si xun ula dhaqanka caruurta, inkastoo ay kaligeed dhici karto.

29. **Xadgudub galmo:** wuxuu laxariiraa kuqasbida ama kucadaadinta ilmo ama qof da'yar inuu qayb kanoqdo falal galmo ah, daruuri maaha in rabshad kujirto, ama ilmuhu ha ogaado waxa dhacaya ama yuu ogaan. Falalka waxaa kujiri kara taabasho jireed, oo ay kamid tahay weerar laxiriira in ilmaha loo galmoodo (tusaale kufsi ama galmada afka) ama falalka aan ahayn galmada sida siigaysiga, dhunkashada, istiiminta iyo taabashada dusha laga taabto asagoo dhar qaba. Waxaa sidoo kale kamid noqon kara falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo fiirsashada, ama soosaarista, sawirku galmo ah, daawashada muuqaalada galmada, kudhiirrigalinta caruurta inay udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si aad xadgudub ugu samayso. Xadgudubka galamada ayaa kadhici kara khadka onlaynka, farsamada casriga ah ayaana loo adeegsan karaa fududaynta xadgudub aan onlayn ahayn. Xadgudubka galmada maaha mid ay kaliya sameeyaan rag qaangaarka ah. Haweenka ayaa sidoo kale gali kara xadgudub galmo, si lamid ah sida ay ugu samayn karaan caruurta kale. Tacaddiga galmada caruurtu ee caruurta kale kula kacdo waxaa weeye mushkilad ay tahay in laga ilaaliyo waxbarashada oo **dhammaan** shaqaalaha waa iney la socdaan oo siyaasada dugsiga ama kuliyadaa iyo nidaamyada arrintaas ka hadlaya.

30. **Dayacaada:** waa fashilka joogtada ah ee ku aadan buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee jireed iyo/ama maskaxeed ee caruurta, taasoo ay ubadantahay iney abuurto naafo ba'an oo gaarta caafimaadka ama kobaca ilmaha. Dayaca ayaa dhici kara intay hooyadu uurka leedahay, tusaale ahaan, sabab laxariirta in hooyadu cabi jirtay waxyaabaha maandooriyaasha ah. Marka ilmuhu dhasho, dayacaaddu waxay ku lug yeelan kartaa waalidka ama daryeelaha oo ku guul daraystay: bixinta cunto, dhar iyo hoy ku filan (oo kamid tahay ka saarida guriga ama ka tagis); ka ilaali ilmaha waxyeellada jireed iyo dareenka ama khatarta; xaqiiji kormeer ku filan (oo ay kamid tahay isticmaalka daryeelayaasha aan ku filnayn); ama hubi helitaanka daryeel caafimaad ama daaweyn habboon. Waxaa sidoo kale kamid noqon kara dayacaadda, ama inaan qofku kajawaabi karin, baahiyaha aasaasiga ah ee shucuurta ilmaha.

## Arrimaha ilaalinta

31. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney kawarqabaan arimaha ilaalinta kuwaasoo ilmaha galin kara halis ah in dhibaato gaarto. Dabeecadaha ku xiran arrimaha sida qaadashada maandooriyaha iyo/ama si xun u isticmaalka khamriga, waxbarashada si ula

kac ah loo waayay, rabshado ba'an[8] (oo ay kamid tahay kuwa ku xiran khadadka ismaamulka), xag-jirnimada iyo heshiis la'aanta iyo wadaaga aan raali ka ahayn ee sawirada qaawan iyo kuwa qeyb ahaan qaawan iyo/ama muuqaallada ayaa noqon kara calaamado muujinaya in caruurtu halis ku jiraan. Hoos waxaa ku jira qaar kamid ah mushkilada ilaalinta ee dhammaan shaqaalaha ay tahay iney ogaadaan. **Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan arrimahan ilaalinta iyo macluumaadka kusaabsan arrimaha kale ee ilaalinta ayaa lagu daray Lifaaqa B.**

## Tacaddiga ilmaha kula kaco ilma kale

32. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney la socdaan in caruurta ay tacadi caruurta kale kula kaci karto (taas oo badanaa loo yaqaan tacadiga ilmaha kula kaco ilma kale), oo ay ka dhici karto gudaha iyo banaanka dugsiga ama kuliyada iyo onlaynka. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney caddeeyaan nidaamka iyo nidaamka dugsiga ama kuliyada ee la xiriira xadgudubka ubadka iyo doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin ka hortagga iyo ka jawaabista halka ay aaminsan yihiin in ilmuhu khatar uga iman karo.

33. **Dhammaan** shaqaaluhu waa inay fahmaan in xataa hadii aan lasoo gaadhsiinin dugsigooda ama kuuliyadooda kama dhigna ineysan dhicin, waxaa dhici karta in aan kaliya la sheegin uun. Waxaa muhiim ah in hadii shaqaalaha ay qabaan **wax** walaac ah oo ku saabsan tacadiga ilme-ilme kale kula kaco inay kala hadlaan hogaanka ilaalinta loo igmaday (ama ku xigeenkiisa).

34. Waxaa daruuri ah in **dhammaan** shaqaalaha ay fahamaan muhiimiyada caqabadaha habdhaqanka aan munaasabka ahayn ee u dhaxeeya caruurta, qaar badan oo kamid ah waxay ku qoranyihiin hoos, kuwaas oo ah tacaddi dabiici. Iska indha tirista habdhaqannada qaar, tusaale iska indha tirista dhibaataynta galmoo lagasoo qaado "keliya kaftan", "keliya shactiro", "qayb kamid ah korriinka" ama "wiil markasta waa wiil" ay abuurayso caadi kadhigista habdhaqanno aan la aqbali karin, goob aan badqab u lahayn carruurta mararka ugu xunna dhaqan caadi ka dhigaaya xadgudubka taasoo keenaysa in carruurtu u qaataan wax caadi ah aysana ku dhiiran inay soo sheegaan.

35. Tacaddiga ilmaha kula kaco ilama kale waxay u badantahay iney kamid noqdaan, laakiin kuma koobna:

- gardaraysiga (ay kamid tahay gardaraysiga internet-ka dhaxdeeda, wax cuqdad ku saleysan iyo gardaraysiga takoorka)

---

[8] Lawadaagista dhinacyadu isla aqbaleen ee sawirada, gaar ahaan kuwa ay wadaagaan carruurta waaweyn ee isku da'da ah, ayaa u baahan karta jawaab gaar ah waxaa laga yaabaa inaysan ahayn xadgudub – laakiin carruurtu waa iney wali ogaadaan iney tahay sharci darro- halka wadaagista aan qofka kale ogolaan ay tahay sharci darro iyo xadgudub. UKCIS waxay talo faahfaahsan ka bixinaysaa wadaagista sawirada iyo muuqaallada qaawan mise qayb ahaan qaawan.

- tacadiga xiriirka jacayl ee shakhsiyadeed ee u dhexeeya caruurta (mararka qaar loo yaqaan 'tacadiga xiriirka dhawr iyo toban jirada')
- tacaddiga jirka sida wax ku kudhufasho, laadid, gilgilid, garaac, timo jiidid, ama waxyeelo kale oo jir (waxaa kamid noqon kara shayo onlayn ah oo fududayn kara, waxyeeli kara iyo/ama horseedi kara tacadi jir)
- Xadgudubka galmada[9] sida kufsiga, weerarka galmo iyo faraxumaynta; (tani waxaa kamid noqon kara nooc onlayn ah kaas oo fududeeya, hanjabaada iyo/ama dhiirrigeliya rabshadaha galmada)
- dhibaataynta galmada[10] sida faallooyinka galmada, hadalada, kaftanka iyo dhibaataynta galmada ee internet-ka, taas oo noqon karta kali ama qayb ka mid ah qaab xadgudubka balaaran
- oo ku keena qof inuu sameeyo hawlo galmo isaga oo aan raalli ka aheyn, sida in qof lagu khasbo inuu dharka iska saaro, u taabasho qaab galmo qof, ama in uu la sameeyo galmo cid kale
- wadaagga is-afgaradka iyo is-afgarad la'aanta ah ee sawirada qaawan iyo qayb ahaan qaawan iyo/ama muuqaalada[11] (sidoo kale loo yaqaan qoraalka galmada ama sawirada galmo oo ay dhalinyarada soo saareen)
- upskirting[12] kaas oo sida caadiga ah ku lug leh in sawirk laga qaado goonada hoosteeda ogolaansho la'aan, iyada oo ujeedadu tahay in ay daawato xubintooda taranka ama dabada si ay ugu qancaan galmada, ama u keento dhibbanaha bahdil, ciriiri, ama qeylo dhaan, iyo
- Abuurista/bilaabida nooc rabshad ama saansaanteeda (tan waxaa kamid noqon kara falalka la xariira dhibaataynta, xadgudubka ama bahdilaada loo adeegsado qaab qfka loogusoo daro koox waxaana sidoo kale ku jiri kara waxyaabaha oonlaynka ah).

---

[9] Wixii macluumaad dheeraad ah ee khuseeya xadgudubka galmada ka eeg Faraqa 5 iyo Lifaaqa B.
[10] Wixii macluumaad dheeraad ah ee khuseeya dhibaataynta galmada ka eeg Qaybta 5 iyo Lifaaqa B.
[11] Hagaha UKCIS: [Sharing nudes and semi-nudes advice for education settings (Wadaagista sawirada qaawan mise qayb ahaan qaawan marka la joogo xarumaha waxbarashada)]
[12] Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan 'upskirting' eeg Lifaaqa B.

## Kafaa'idaysiga Dambiyada Carruurta (CCE) iyo Ka faa'idaysiga Galmada Carruurta (CSE)

36. Labadaba CCE iyo CSE waa qaabab xadgudub oo dhaca marka qof ama koox ay ka faa'idaystaan kala saraynta awooda si ay ugu qasbaan, u marin habaabiyaan ama u khiyaameeyaan ilmo si uu uga qaybgalo fal galmo ama dambi, si uu ugu badasho wax dhibanuhu u baahanyahay ama doonaayo, iyo/ama faa'idada dhaqaalaha ama darajo kordhinta diyaariyaha ama fududeeyaha iyo/ama si xoog ah ama hanjabaad xoog u sheegasho ah. CSE iyo CCE ayaa saamayn kara carruurta, lab iyo dhaddig ba waxaana ku jiri kara carruurta lasoo dhoofiyay (oo caadiyan loogu yeero dad dhoofin) si looga faa'iidayso.

## Uga faa'idaysiga Carruurta Falalka Dambiga ah (CCE)

37. Noocyada qaar ee CCE-ga waxaa kamid ah in caruurta lagu qasbo ama lagu siyaasadeeyo iney mukhaadaraad ama lacag cid ugu wareejiyaan khadka dagmada, inay ka shaqeeyaan warshad mukhaadaraad, iney tukaan wax ka xadaan, ama iney cid jeeb siibaan. Waxaa sidoo kale lagu qasbi karaa ama lagu qaadi karaa iney galaan fal danbiyeedka gaariyaasha ama ku hanjabida/samaynta rabshad xun oo ka dhan ah dadka kale.

38. Caruurta ayaa ku dhax xanibmi kara noocyadan ka faa'idaysiga, maadaama oo dambiiluhu uu ugu hanjabi karo dhibanaha (iyo qoysaskooda) iney waxyeeli doonaan ama iney ku xanibaan oo ay ku qasbaan deyn lagu leeyahay. Waxaa lagu qasbi karaa inay qaadaan hub sida mindiyo ma iney bilaabaan qaadashada mindi si ay u siiso dareen difaac ay ka helaan wayeelo kasoo gaarta dadka kale. Ayadoo carruurta qaybta ka ah ka faa'iidaysiga fal dambiyeedyada ay badanaa galaan danbiyo, nugulkooda ka dhibanayaal ahaan maaha wax markasta ay aqoonsadaan dadka waawayn iyo xirfadlayaashu, (gaar ahaana carruurta roon-roon), loolamana dhaqmo iney yihiin dhibanayaal inkastoo ay waxyeelo ku dhacayso. Wali waxaa looga faa'iidaysan karaa fal dambiyeedyada xataa haddii falku u muuqdo wax ilmuhu aqbaleyn ama ay rabaan.

39. Waa muhiim in la ogaado in khibrada ay maraan gabdhaha falalka dambiga loo adeegsaday ay aad uga duwanaan karto wiilasha. Calaamadaha ayaa kala duwanaan kara, hase yeeshee xirfadlayaashu waa iney ogaadaan in gabdhaha loo adeegsan karo falalka dambiga sidoo kale. Sidoo kale waa muhiim iney ogaadaan in labadaba wiilasha iyo gabdhaha loo adeegsaday fal dambiyeedka ay khatar dheeraad ah ugu jiraan in looga faa'iidaysto falalka galmada.

## Uga faa'idaysiga Carruurta Falalka Galmada ah (CSE)

40. CSE waa qaab kamid ah xadgudubka galmada ilmaha. Xadgudubka galmo waxa uu ku lug yeelan kara taabashada jirka, oo ay ku jiraan weerarka galmo (tusaale, kufsiga ama galmada afka) ama falalka aan galmo lahayn sida siigeysiga, dhunkashada, istiiminta iyo taabashada dusha laga taabto asagoo dhar qaba. Waxaa sidoo kale kujira falalka aan taabashada lahayn, sida in ilmaha laga qaybgaliyo samaynta sawirada galmada, ku qasbida ilmaha inay fiirshaan sawirada galmada ama ay daawadaan muuqaallada galmada, kudhiirri

galinta caruurta iney udhaqmaan qaab galmo ahaan khaldan, ama udiyaarinta ilmaha si aad xad gudub ugu sameeyaan ayna ku jirto kan dhanka internet-ka.

41. CSE waxa uu dhici karaa mudo ama hal mar oo waxa uu dhici karaa iyada oo aanu ilmuhu ogeyn tusaale ahaan in muuqaal ama sawiro lagula wadaago baraha bulshada.

42. CSE waxay saamayn kartaa ilmo kasta oo lagu qasbay iney sameeyaan hawlo galmo. Waxaa kamid ah 16- iyo 17- sano jir waxa uu si sharci ah u ogolaan karaan galmada. Carruurta qaarkood ma dareemaan in laga faa'iidaysanayo waxaana laga yaabaa iney rumaystaan iney xiriir jacayl oo dhab ah ka dhexeeyo.

### Tacaddiga Guriga

43. Tacaddiga guriga waxa uu keeni karaa habdhaqano kala duwan oo waxa uu noqon karaa dhacdo kaliya ama dhacdooyin joogto ah. Tacaddigu waxa uu noqon karaa, laakiin kuma xadidna, maskixiyan, jir, galmo, dhaqaale ama shucuur. Caruurta ayaa u noqon kara dhibane tacaddiga guriga. Waxay arki, maqli ama dareemi karaan saamaynta tacaddiga guriga oo/ama waxay la kulmi karaan tacaddiga guryaha ee xiriirka jacayl (tacaddiga xiriirka dhawr iyo toban jirrada). Kuwaas oo dhan waxay ku yeelan karaan saameyn xun iyo saameyn aayatiinka fog ee caafimaadkooda, ladnaantooda, korriinkooda, iyo awooddooda waxbarasho.

### Gudniinta Fircooniga Gabdhaha(FGM)

44. Iyadoo **dhammaan** shaqaalaha ay tahay iney la hadlaan hogaanka ilaalinta loo doortay (ama ku xigeenka) ee ku saabsan wixii walaac gudniinka fircooniga ah (FGM), waxaa jira **waajibaad sharci oo gaar ah oo saaran macalimiinta**[13]. Hadii bare, kujira shaqada xirfadiisa, uu ogaado in tallaabo dhanka FGM ka ah lagu sameeyay gabar kayar da'da 18 sano jir, macalinka waa **waajib** inuu arintaan kuwargaliyo booliiska. Eeg bogga 154 wixii macluumaad dheeraad ah.

### Caafimaadka Dhimirka

45. **Dhammaan** shaqaalaha waa iney ogaadaan in dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka, xaaladaha qaarkood, ay noqon karaan tilmaame ubadka soo gaartay ama uu halis ugu jiro in la dhibaateeyo, dayacaad, ama isticmaal.

46. Kaliya shaqaalaha sida saxda ah loo tababaray ayey tahay iney isku dayaan baarida cilad dhanka caafimaadka dhimirka ah. Hase yeeshee, shaqaalaha waxbarashada, waxay fursad fiican u haystaan inay la socdaan carruurta maalin kasta ayna aqoonsadaan ilmaha dabeecadiisu muujinayso inuu waajahaayo cilad dhanka

---

[13] Sida ku xusan farqada 5B(11) (a) ee Sharciga Gudniinka Gabdhaha 2003, "bare" waxaa laga wadaa, marka laga fiirsho dhanka sharciga England, qof kujira farqada 141A(1) ee Sharciga Waxbarashada 2002 (shaqsiyaadka loo shaqaalaysiiyay mise qaybta ka ah fulinta shaqada macalinimada oo ay wax kubaraan dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarasho ee kuyaala England).

caafimaadka dhimirka ah ama khatar ugu jiro inuu cilad waajaho. Dugsiyada iyo kulyadaha ayaa heli kara talooyin badan oo ka caawinaaya aqoonsiga carruurta u baahan taageerada dheeraadka ah ee caafimaadka dhimirka, tan waxaa kamid ah la shaqaynta wakaalado dugsiga ka baxsan.

47. Haddii shaqaalaha ay ka qabaan walaac caafimaadka dhimirka ee ilmaha kaas oo sidoo kale ah walaac ilaalin, waa in tallaabo dagdag ah laga qaadaa si loo raaco siyaasadda ilaalinta carruurta ee dugsigooda ama kulliyadda, iyo iyadoo lala hadlayo hoggaanka ilaalinta ee loo magacaabay ama ku-xigeen.

### Rabshad halis ah

48. **Dhammaan** shaqaalaha waa inay la socdaan calaamadaha, oo ay dhici karto inay kamid yihiin calaamadaha caruurta ee khatarta ugu jirta, ama dhici karta iney ku lug leeyihiin, danbi aad u wayn. Kuwaas waxaa kamid noqon kara maqnaanshaha korodhka ee dugsiga ama kuliyada, isbaddalka saaxiibtinimada ama xiriirka shakhsiyaadka ama kooxaha waaweyn, hoos u dhac weyn oo ku yimaada waxqabadka waxbarashada, calaamadaha waxyeellada ama isbaddalka ladnaanta, ama calaamadaha weerarka ama dhaawacyada aan la garanayn. Hadiyado aan la garanaynin cida laga heley ama haysasho alaabaad cusub ayaa sidoo kale noqon kara in caruurta ay u yimaadeen, ama ay la shaqeeyaan, shakhsiyaad dambiyo faraha kula jira oo ka tirsan dalad dambi ama burcad oo waxaa dhici karta inay ku jiraan khatar in la isticmaalo.

### Taageero iyo macluumaad dheeraad ah

49. Talada waaxda What to do if you’re worried a child is being abused: advice for practitioners (Waxa la sameeyo haddii aad ka walwalsan tahay in ilmo lagu xadgudbo: talada dhakhaatiirta) waxay ku siinaysaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan fahamka iyo aqoonsiga xadgudubka iyo dayaca. Tusaaleyaasha tilmaamayaasha suurtagalka ah ee xadgudubka iyo dayacaadda ayaa lagu muujiyey taladaas oo dhan waxayna si gaar ah u caawin doontaa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada. Mareegtada NSPCC waxa kale oo ay bixisaa macluumaad dheeraad ah oo faa'iido leh oo kusaabsan xadgudubka iyo dayaca iyo waxa loo kuurgalo.

50. **Lifaaqa B wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo muhiim ah oo kusaabsan noocyada gaarka ah ee xadgudubka iyo arrimaha ilaalinta. Hogaamiyayaasha dugsiyada iyo kulyadaha iyo shaqaalaha sida tooska ah ula shaqeeya carruurta waa iney akhriyaan lifaaqa B.**

## Waxa shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada ay tahay iney sameeyaan haddii ay walaacyo kaqabaan ilmo

51. Shaqaalaha u adeegaaya caruurta waxaa lagu boorrinayaa inay diirada saaraan fikirka ah **‘halkan ayey kadhici kartaa’** marka arintu laxariirto ilaalinta ilmaha. Markay

walaac kaqabaan badqabka ilmo, shaqaaluhu waa iney markasta qaadaan talaabada **maslaxada ugu fiican** ilmuhu ku qabo.

52. Hadii shaqaalaha qabo **wax walaaca** oo kusaabsan badqabka ilmaha, waa iney ka qaadaan talaabo **dagdag.** Ka fiiri bogga 22 shaxda isku aadka ah taasoo sheegaysa hanaanka ay racayaan shaqaaluhu marka ay walaac kaqabaan ilmo.

53. Hadii shaqaalaha walaac qabaan, waa inay raacaan xeerka difaaca ee ururkooda ayna arinta usheegaan hogaamiyaha loo magacaabay ilaalinta ilmaha (ama kuxigeenka).

54. Dookhyada ayaa intaas kadib noqon kara:

- maaraynta taageero kasta oo ilmaha gudaha ah iyada oo loo marayo nidaamka taageerada xoola-dhaqatada ee dugsiga ama kuliyada
- samaynta qiimaynta caawimada hore[14] ama
- u gudbinta adeegyada[15] astaanta tusaale sida uu ilmuhu u baahnaan karo, u baahan yahay, ama uu dhiban yahay, ama ay u badan tahay in uu dhibaato soo gaarto.

55. Hogaanka ilaalinta loo magacaabay (ama kuxigeenka) waa in had iyo jeer ay diyaar u ahaadaan ka hadalka walaacyada ilaalinta. Hadii marka ay jiraan xaalado gaar ah, uusan hogaanka loo macaaabay ilaalinta (ama kuxigeenka) uusan joogin, arintaan maqnaanshihiisu waa iney daahin talaabo sax ah oo ay tahay in laqaado. Shaqaalaha waa iney la hadlaan xubin kamid ah kooxda maamulka sare iyo/ama ay talo waydiiyaan daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka. Xaaladahan oo kale, wixii talaabo ah ee la qaaaday waa in lala wadaagaa hogaanka ilaalinta loo magacaabay (ama ku xigeenkiisa) sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

56. Shaqaalaha waa iney kafakarin in xubin shaqalaaha kamid ah ama xirfadle kale uu qaado talaabo uuna lawadaago macluumaad muhiim u ah badbaadinta nolosha caruurta. Waa iney niyada ku hayaan in wadaagista xogta xili hore ay muhiim u tahay aqoonsiga, qiimaynta, iyo qoondaynta waxtarka leh ee bixinta adeegga ku haboon, hadday tani tahay marka koobaad ee ciladu soo muuqato, ama marka ilmo horay u yaqaaneen maamulka maxaliga ah ee daryeelka bulshada ee carruurta (sida ilmo u baahan ama ilmo leh qorshaha difaaca). Information sharing: advice for practitioners

---

[14] Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan qiimaynta caawinta hore, bixinta adeegyada caawinta hore iyo adeegyada galitaanka waxa ay ku yaalaan Cutubka 1 ee Working Together to Safeguard Children (Kawada-shaqeynta Badqabka Caruurta).

[15] Cutubka 1 ee Working Together to Safeguard Children (Kawada-shaqeynta Badqabka Caruurta) waxaa uu dhigayaa qaabka ilaalinta ee lagu baahiyay waraaqaha macluumaadka oo muujinaya shuruudaha, oo ay ka mid yihiin heerka baahiyaha, wakhtiga kiiska ay tahay in loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka ee qiimaynta iyo adeegyada sharciga ee hoos yimaada faraqa 17 iyo 47. Sarakiisha dawlada deegaanka, oo kaashanaaya iskaashatadooda, waa iney abuuraan ayna soo dhajiyaan maamus maxali ah oo lagu samaynaayo qiimaynta. Maamuuska maxaliga ah waa inuu dajiyaa nidaamyo qeexan oo ku aadan qaabka kiisaska loo maaraynayo marka ilmaha loosoo gudbiyo maamulka deegaanka ee daryeelka arimaha bulshada ee caruurta.

providing safeguarding services to children, young people, parents and carers (Wadaagista macluumaadka: la-talinta xirfadlayaasha bixiya adeegyada ilaalinta carruurta, dhalinyarada, waalidiinta iyo daryeelayaasha) waxay taageertaa shaqaalaha ay tahay inay go'aan ka gaaraan wadaagga macluumaadka. Taladaan waxaa kujira todobada xeer ee muhiimka u ah wadaagista macluumaadka iyo kabaaraan dagisyada ku aadan Sharciga Difaaca Macluumaadka 2018(DPA) iyo Xeerka Guud ee Difaaca Macluumaadka (UK GDPR).

57. **DPA iyo UK GDPR <u>ma</u> baajiyaan wadaagista macluumaadka wixii loogu talogalay ilaalinta caruurta amaankooda iyo kor u qaadida badqabkooda.** Haddii shaki kaaga jiro wadaagista macluumaadka, shaqaalaha waa iney la hadlaan hoggaanka loo magacaabay ilaalinta (ama kuxigeenka). Baqdinta ku aadan faafinta macluumaadku **<u>waa waajib inaan</u>** loo ogolaan iney caqabad kunoqoto baahida looqabo ilaalinta iyo hormarinta faya dhawrka carruurta.

## Qiimaynta caawinta hore

58. Hadii caawinta hore ay tahay waxa haboon, hogaanka loo magacaabay ilaalinta (ama kuxigeenka) ayaa caadiyan hogaaminaaya laxariirida wakaaladaha kale iyo diyaarinta qiimayn ay wakaaladuhu isla sameeyaan sida kuhaboon. Shaqaalaha waxaa looga baahan karaa iney taageeraan shaqaalaha kale iyo xirfadlayaasha kale inta lagu jiro qiimaynta caawinta hore, ayagoo mararka qaar noqon kara hogaanka qiimaynta. Markan oo kale waa in si joogto ah loo qiimeeyaa oo la eegaa in loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka si ay ugu sameeyaa qiimaynta adeegyada sharciga hadii xaalada ilmuhu ayna kasoo raynin ama ay kasii darto.

## Qiimaynnada iyo adeegyada sharciga ah ee daryeelka bulshada carruurta

59. **Marka ilmuhu uu dhibanyahay, ama ay u badantahay iney soo gaarto waxyeello, waxaa muhiim ah in loo gudbiyo daryeelka bulshada caruurta maamulka deegaanka (iyo hadii ay ku munaasab tahay bilayska) isla markiiba**. Wargalinadu waa iney racaan hanaanka wargalinta ee maxalLiga ah.

60. Qiimaynta daryeelka bulshada ee dawlada hoose waa iney tixgelisaa meelaha carruurta lagu waxyeeleeyo xaaladaha ka baxsan guriga, sidaa darteed waa muhiim in dugsiyada iyo kulyadaha ay bixiyaan macluumaadka ugu badan ee suurtagalka ah iyada oo qayb ka ah geedisocodka gudbinta. Tani waxay usahlaysaa qiimayn kasta iney xisaabta kudarsato dhammaan cadaynta laheli karo waxayna fududaynaysaa qaab naqshadaysan oo loo xaliyo dhibaatadaas. Macluumaad dheeraad ah ayaad ka helaysaa halkaan: Contextual Safeguarding (Macnaha Ilaalinta).

61. Agabka onlaynka Report child abuse to your local council (Ka warbixi xadgudubka ilmaha golaha deegaankaaga) ayaa ku toosiya maamulka deegaanka ee khuseeya

faahfaahinta xiriirka daryeelka bulshada.

### Caruurta baahida qaba

62. Ilmo baahi qaba waxaa lagu qeexay Sharciga Caruurta ee 1989 inuu yahay ilmo ay ubadantahay inuusan kuguulaysan karin ama haysan karin heerka macquulka ah ee caafimaadka ama kobaca, ama caafimaadkiisa iyo kobaciisu ay ubadan tahay in si wayn ama si dheeri ah dhaawac usoo gaaro, hadaan lasiin adeegyada; ama ilmo naafo ah. Maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa inay siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan faraqa 17 ee Xeerka Caruurta 1989.

### Caruurta la ildaran ama ubadan iney la ildaranyihiin dhibaato culus:

63. Maamulka deegaanka, oo kaashanaaya ururada kale ee hawshaani qusayso, waxaa masuuliyad kasaarantahay baaritaan kusameeyaan si waafaqsan faraqa 47 ee Xeerka Caruurta 1989 haday hayaan cadayn macquul ah oo ay uga shakiyaan in ilmo yar xaalad xun kujiro, ama laga yaabo inuu la dhibtonaayo, dhibaato culus. Xog uruurintaas ayaa u sahlaysa iney go'aanshaan iney qaadaan iyo in kale wax talaabo ah si loo ilaaliyo badqabka loona hormariyo faya dhawrka ilmaha waana in loo sheegaa marka ay jiraan walaacyo la xariira ilmo sixun loola dhaqmay. Waxaa kamid ah **dhammaan** noocyada tacaddiga iyo dayacaada.

### Maxay tahay inay sameeyaan maamulka deegaanka?

64. Maalin gudaheed marka lasoo gudbiyo wargalinta, shaqalaaha arimaha bulshada ee maamulka maxalliga ah waa inuu xaqiijiyaa helitaanka wargalinta oo ay go'aan kagaaraa tallaabooyinka xiga ee laqaadayo iyo nooca warcelinta loo baahanyahay in labixiyo. Tani waxaa kamid ah go'aan gaarista in:

- ilmaha u baahan ilaalinta dakhsaha ah iyo talaabo degdega ah u baahan
- wixii adeegyo ah ee uu u baahan yahay ilmaha iyo qoyska iyo nooca adeegyada
- in ilmuhu baahi qabo, ayna tahay in qiimayn lagu sameeyo si waafaqsan faraqa 17 ee Xeerka Caruurta 1989. Cutubka koowaad ee Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Badbaadint Carruurta) waxa uu bixiyaa tafaasiisha geedisocodka qiimaynta
- waxaa jirta sabab macquul ah oo looga shakisanyahay in ilmuhu silcayo, ama ay u badantahay iney soo gaarto dhaawac culus, iyo in la sameeyo weydiin, iyo in ilmaha lagu qiimeeyo faraqa 47 ee Xeerka Carruurta 1989. Cutubka koowaad ee Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Badbaadada Carruurta) waxa uu bixiyaa tafaasiisha geedisocodka qiimaynta, iyo

- in qiimaynada dheeriga ah ee takhasuska leh loo baahanyahay si looga caawiyo maamulka deegaanka go'aaminta nooca talalabada dheeriga ah ee laqaadayo;

65. Wargalinta waa in dabagal lagu sameeyaa haddii macluumaadkaan uu yahay mid billow ah.

66. Haddii shaqaalaha bulshada ay go'aansadaan iney sameeyaan qiimaynta sharciga, shaqaalaha waa inay sameeyaan wax kasta oo ay ku taageeri karaan qiimaynta (waxaa taageera hogaanka ilaalinta loo magacaabay (ama kuxigeenka) sida loogu baahdo).

67. Haddii, kadib gudbinta, xaalada ilmuhu aysan umuuqan mid kasoo raynaysa, wargalintu waa iney martaa habraacyada soosocda ee sii balaarinta qadiyada maxaliga ah si loo hubiyo in walaacyada laxaliyo lana, sida ugu muhiimsan, kor looqaado xaalada ilmaha.

## Ilaalinta diiwanka

68. **Dhammaan** walaacyada, doodaha iyo go'aanada lagaaro, iyo sababaha go'aanadaas loo cuskadoba, waa in ayagoo qoran diiwaanka lagaliyaa. Tani waxay sidoo kale ka caawisaa hadii/goorta wax cabasho ah oo kusaabsan qaabka kiiska ay sameeyeen dugsiga ama kuliyada. Macluumaadka waa iney ahaadaan kuwo qarsoodi ah meel ammaan ahna lagu kaydiyaa. Waa dhaqan wanaagsan in walaacyada iyo gudbinta lagu hayo fayl gaar ah oo ilaalinta ilmaha ee ilmo kasta.

Diiwaannada **waa iney** ku jiraan:

- guudmar cad oo dhamaystiran oo ku saabsan walaacyada
- faahfaahinta sida walaacyada loo daba galay ee loo xaliyay, iyo
- Cadaynta tallaabo kasta oo la qaaday, go'aannada la gaaray iyo natiijada.

69. Haddii ay walaacyo kaqabaan shuruudaha diiwaan haynta, shaqaalaha waa iney arintaas kala hadlaan hogaanka loo magacaabay ilaalinta (ama kuxigeenka).

## Maxay dhammaan arimahan muhiim u yihiin?

70. Waa muhiim in caruurtu hesho caawinta saxda ah xilliga kuhabboon si looga hortago halisaha ilaalinta badqabka, loogana difaaco arimaha ugasii dari kara halisaha jira iyo hormarinta faya dhawrka ilmaha. Cilmi-baarista iyo dibu eegista ku dhaqanka ilaalinta ubadka deegaanka ayaa si isdaba joog ah u muujiyay khatarta ah in la qaadi waayo tallaabo wax ku ool ah[16]. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u eegista

[16] Falanqeynta dibu eegista kiisaska halista ah waxaa laga heli karaa gov.uk/government/publications/serious-case-reviews-analysis-lessons-and-challenges.

ku dhaqanka ilaalinta ubadka deegaanka ayaa laga heli karaa Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Badbaadinta Carruurta). Tusaalayaasha tallaabooyinka daciifka ah waxaa kujira:

- fashilka tallaabo qaadashada iyo u gudbinta calaamadaha hore ee tacaddiga iyo daycaada
- diiwaan keydin liidata
- in la dhagaysan waayo aragtida ilmaha
- in dib loo qiimayn waayo walaacyada marka xaaladda aysan kasoo rayn
- in aan lala wadaagin macluumaadka dadka saxda ah iyo hay'adaha dhaxdooda
- in macluumaadka si aad u gaabis u ah loo wadaago, iyo
- inaadan kucadaadin dadka u muuqda inaysan qaadayn talaabadii loo baahnaa.

## Waxay shaqaalaha dugsiga iyo kuliyada ay tahay iney sameeyaan haddii ay qabaan walaacyo ilaalin ama ay jirto eedeyn kusaabsan shaqaale kale

71. Dugsiyada iyo kulyadaha waa iney haystaan nidaamyo iyo habraacyo u meel yaala oo lagu maamulayo **wax** kasta oo walaacyo ilaalin ama eedeymo ah (inta ay doontaan ha le'kaadaane) ee ku saabsan xubnaha shaqaalaha (oo ay kamid tahay shaqaalaha agabka, dadka waqtigooda ku deeqay, iyo qandaraasleyda).

72. Haddii shaqaalahq ay qabaan walaac ilaalin ah ama eedeymo ah in la **waxyeeleeyo ama khatar loo geysto carruur** waxaa laga sameeyaa xubin kale oo shaqaalaha ah (ay kamid tahay shaqaalaha saadka, mutadawiciinta, iyo qandaraasleyda), dabadeed:

- waa in tan loo gudbiyaa maamulka bareyaasha ama maamulaha
- meesha ay jiraan walaacyo/eedeymo ku saabsan maamulka baraha ama maamulaha, waa in tan loo gudbiyaa barasaabka, gudoomiyaha gudida maamulka ama dib gaystaha dugsiga madaxa banaan, iyo
- Haddii ay dhacdo walaac/eedeyn ku saabsan maamulaha, oo uu maamuluhu sidoo kale yahay mulkiilaha kaliga ah ee dugsi madaxbannaan, ama xaalad ay jirto khilaaf daneed oo kusaabsan in arrinta loo sheego madaxa, taas waa in si toos ah loogu wargeliyaa Saraakiisha loo magacaabay maamulka deegaanka (LADO). Faahfaahinta LADO-ga deegaankaaga ayaa si fudud looga heli karaa webseedka maamulka deegaankaaga.

73. Haddii shaqaalaha ay qabaan walaac ilaalin ama lagu eedeeyay xubin kale oo

shaqaale (oo ay ku jiraan shaqaalaha agabka, dadka wakhtiga ku deeqay ama qandaraasle) oo **uusan** buuxin heerka waxyeelada, markaa waa in walaacan loo sheegaa sida ay dhigayaan siyaasada heerka hoose ee walaaca ee dugsiga ama kuliyada. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa Qaybta afraad ee hanuunintan.

## Waxa shaqaalaha dugsiga ama kuliyada ay tahay iney sameeyaan haddii ay walaacyo kaqabaan xeerarka ilaalinta caruurta ee kajira dugsiga ama kuliyada

74. Dhammaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta waa iney dareemaan iney awood u leeyihiin iney kor u qaadaan walwalka kusaabsan dhaqanka liita ama aan badbaadada lahayn iyo guul-darrooyinka ka iman kara ilaalinta dugsiga ama kuliyada oo ay ogaadaan in walaacyadan ay si dhab ah u qaadan doonaan kooxda hoggaanka sare.

75. Habraacyo ku habboon kashifida waa in loo dajiyaa si walaacyadan oo kale loogala hadlo kooxda hoggaanka sare ee dugsiga ama kuliyada.

76. Marka xubin kamid ah shaqaalaha uu daremo inuusan awoodin sheegista khatar ka imaanaysa qofka ay ushaqeeyaan, ama uu dareemaayo in walaacyadiisa rasmiga ah aan waxba laga qabanayn, marinno kale oo ay wax ku kashifi karaan ayaa u furan:

- Hagaha guud ee qarxinta walaaca ayaa laga heli karaa: Whistleblowing for employees (Farmuuqidda shaqaalaha)
- NSPCC Whistleblowing Advice Line (Khadka Talada Farmuuqidda NSPCC) ayaa diyaar u ah sidii dariiq kale oo loogu talagalay shaqaalaha aan dareemin inay kor u qaadi karaan walaaca kusaabsan fashilinta ilaalinta ilmaha gudaha, ama ka walaacsan habka walaaca ay u maareeyaan dugsigooda ama kulyadooda. Shaqaalaha waxay wici karaan 0800 028 0285 khadkana waxa uu diyaar yahay 08:00 ilaa 20:00 Isniin ilaa Jimce, iyo 09:00 ilaa 18:00 dhammaadka sitimaanka. Ciwaanka iimeylka waa: help@nspcc.org.uk[17]

[17] Taas badelkeeda, shaqaaluhu waxay u qori karaan: Bulshada Qaranka ee Kahortaga Dhibaataynta Caruurta (NSPCC), Weston House, 42 Curtain, Road, London EC2A 3NH.

## Talaabooyin ku aadan meelaha ay kajiraan walaacyada kusaabasan ilma yar




[1] Kiisaska ay sidoo kale ku lug leeyihiin walaac ama eedayn xadgudub ka dhan ah xubin shaqaale, eeg qaybta afraad ee hagaha.

[2] Caawinta hore waxaa looga jeedaa in taageero lasiiyo ilmaha isla marka dhibaatadu timaado xilli kasta oo kamid ah nolosha ilmaha. In ilmuhu ka faa'iidaysanayo caawinta hore oo la iska kaashaday, qiimaynta caawinta hore ee wakaaladuhu iska kaashadaan waa in la sameeyaa. Eeg Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Badbaadada Carruurta) wixii tusmodheeraad ah

[3] Gudbinta waa inay raacaan hanaanka udagsan ee kuqoran dukumieetiga tixraaca maxalliga ah iyo hab maamuuska qiimaynta ee maxalliga. Cutubka koowaad ee Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Badbaadada Carruurta).

[4] kucad Xeerka Caruurta ee 1989, maamulka deegaanka waxaa laga doonayaa iney siiyaan adeegyada caruurta baahida qaba sababo laxariira ilaalinta badqabkooda iyo hormarinta faya dhawrkooda. Caruurta baahida qabta waxaa lagu qiimayn karaa si waafaqsan qeybta 17 ee Xeerka Caruurta 1989. Sida kucad faraqa 47 ee Xeerka Caruurta 1989, marka maamulka maxalliga ah uu hayo sabab macquul ah oo ay uga shakin karaan in ilmo la dhibtoonaayo ama laga yaabo inuu khatar ugu jiro dhibaato culus, waxaa masuuliyad kasaaran tahay iney samayso baaritaano si loo go'aansado in aan qaadayno talaabo si loo

ilaaliyo badbaadada ilmaha korna loogu qado faya dhawrka ilmaha. Faahfaahin buuxda waxaad kahelaysaa cutubka koowaad ee Working Together to Safeguard Children (Ka wada shaqaynta Badbaadinta Carruurta).

[5] Arintaan waxaa kamid noqon kara Dalbashada Amarka Difaaca Dadaga (EPO).